Dhiirogelinta Daryeelka Xaqsoorka Leh

Dhibaatada iyo araarta

Tan iyo 2013, gobolka Oregon wuxuu hormuud qarameed ka ahaa fulinta cabbirada tayada ee xoogan oo loogu talaglay nidaamkiisa Medicaid, ee la bixiyo iyadoo loo marayo Ururada Daryeelka Isku-duwan (CCO-yada). Cabiradan tayada ee xoogan waxaa ka mid ahaa:

- Warbixinta cabirada tayada iyo helitaanka oo joogta ah, iyo
- Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada oo lagu guuleystay kaasoo diiradda saaraya fejignaanta CCO-yada isla markaana horseedayo horumar la taaban karo oo ku aadan bixinta daryeelka, mahadhada bukaanka iyo natiijooyinka.

Qiimeynta ugu dambeysay ee Qeybta Dib u cusboonaysiinta Ka-tanaasulaada Tijaabada ee 1115(a) ee 2012-2017 ee Oregon ayaa soo gunaanuday in “dhiirigelinada maaliyadeed ee Oregon ay si xooggan ula xiriireen horumarinta waxqabadka.”[1] Tani waxay muujinaysaa in Barnaamijka Dhiirrigelinta Tayada uu bixiyo fursad xooggan oo wax looga qabanayo caqabadaha qaab-dhismeedka ah ee hor istaagaya helitaanka xaqsoorka leh ee daryeelka tayada sare leh.

Inkastoo cabbirrada dhiirigelinta ee heerka gobol iyo kuwa CCO-yada ay muujinayaan in tayada daryeelka ee xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon ay guud ahaan kor u kacday tan iyo 2013, tallaabooyin badan ayaa muujiyeen xaqsoor la'aan markii la sameeyay falanqeyn ku salaysan jinsiyadda, luqadda iyo naafanimada.[2,3] Cunsurinimadda Qaabeysan ayaa badanaa ka dhigaysa in dadka bulshooyinka midabka leh iyo bulshooyinka Qabiilada ah in loo geysto ka shaqeysiin, iyo guriyeyn sinaan la’aan ah, taasoo gelinaysa qatar sii sareysa ee keenta natiijooyin caafimaad daro ah.[4] Cunsuriyadan qaab-dhismeedsan ayaa sidoo kale abuurtay caqabado hor joogsanayo helitaanka daryeelka caafimaadka oo tayada leh, kuwaasoo keenay natiijooyin caafimaad oo ka siidaraya. Si tani loo saxo oo dhammaan xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon loo siiyo helitaanka xaqsoorka leh ee daryeelka tayada sare leh, Oregon waa inay mudnaan siisaa istaraatijiyado:

- Wanaajinayo ka jawaabista dhaqanka bulshada,
- Yareeynayo ceebeynta bulsheed iyo waxyeelada cunsuriyadda, iyo
- Abuurayo helitaanka xaqsoorka leh. [1,2,5]

---

[1] https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/Evaluation%20docs/Summative%20Medicaid%20Waiver%20Evaluation%20-%20Final%20Report.pdf

[2] Qiimeynta Saamaynta Xaqsoorka ee Guddiga Cabbirada & Dhibcaha, Maayo 2021 https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/MetricsScoringMeetingDocuments/6b.-05.2021-MSC-Equity-Impact-Assessment-Report.pdf

[3] Wax-ka-beddelka Nidaamka Caafimaadka Oregon: Warbixinta Ugu Dambeeysay ee 2017 ee Cabbirada CCO, Juun 2018 https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/CCOMetrics/2017-CCO-Performance-Report-Quality-Access-Data.pdf

[4] COVID-19 Vaccine Advisory Committee recommendations 2021 https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li3580.pdf

[5] Tallooyinka Ugu Dambeeyay ee Fadhiga Dhagaysiga ee CCO OHPB. https://www.oregon.gov/oha/OHPB/Documents/OHPB-CCO-Listening-Session-Recommendations-Final.pdf

Marka la eego saamaynta la muujiyay ee cunsuuriyadda qaab-dhismeedsan ay ku leedahay natiijooyinka caafimaad ee dadka ka tirsan bulshooyinka midabka leh iyo bulshooyinka Qabaa'ilka, Oregon waxay qorsheyneysaa inay isticmaasho aalad kasta oo la heli karo si loo baabi'iyo xaqsoor la'aanta caafimaadka. Sida lagu sharaxay gudaha *Miisaaniyadda Guud ee Qiimaha Ku Salaysan* ee warqada fikradda, isbeddellada la soojeediyay ee Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada ee CCO ayaa qayb ka ah istaraatiijiyad dhammaystiran oo lagu xaqiijinayo xaqsoorka laguna wanaajinayo tayada daryeelka. Iyaddoo laga faa'ideysanayo awoodda Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada (Quality Incentive Program) si ay sinnaantu u noqoto mabda'a abaabulinta iyo waafajinta assaasiga ah ee soo jeedintan oo ay la socoto kor-u-qaadidyo kale ee lagu qeexay ka-daynta (waiver), OHA waxey abuuri doontaa habab dhinacyo badan/wajiyo badan leh oo dhiirigelinaysa nidaamka si loo baabi'iyo sinnaan la'aanta caafimaadeed ee si xun/qiyas la'aan u waxyeeleysa bulshooyin badan ee ku nool Oregon. Bulshooyinkaa waxaa ka mid ah Sagaalka Federaal-ahaan Loo Aqoonsan yahay ee ah Qabiilada iyo bulshooyinka qabiilada, Laatiino/Latina/Latinx, Mareykana Madowga/Afrikaanka ah, Aasiyaanka, Dadka Jasiirada Baasifik, Hindida Maraykanka/Dadka Assalka Alaska, bulshooyinka midabka leh, dadka naafada ah, dadka aqoontooda Afka Ingiriisiga ay xadiddan tahay, iyo bulshooyinka soo galootiga iyo qaxootiga.

Istaraatijiyadaha la soojeediyay

Si loo xaqiijiyo in dhammaan xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon ay heli karaan daryeel tayo sare leh iyadoo mudnaanta la siinayo kooxaha dadka ee wajahayo xasoor la'aanta iyo cunsuriyadda qaab-dhismeedsan, mida haddeer jirta iyo mida taariikhiga labadaba, gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa dib-u-qaabaynta Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada si xaqsoorku u noqdo mabda'a abaabul ee aasaasiga ah. Gobolka Oregon wuxuu soojeedinayaa in la beddelo STC 38 si uu uga turjumo awoodda go'aan-qaadashada ee la beddelay ee tixgelineyso ra'yiga/codka bulshada iyo xubnaha, iyo in sidoo kale wax-ka-beddelida STCs 39 iyo 36e.iii si ay si fiican ula jaanqaadaan isbeddellada la soojeediyay.

Gobolka Oregon wuxuu doonayaa inuu nidaamiyo Barnaamijkiisa Dhiirigelinta Tayada si mudnaan loo siiyo xaqsoorka caafimaadka, iyadoo la adeegsanaya dhawr istaraatijiyado oo si wadajir ah u shaqeynayo:

1. Xaqiiji booska shaqada xaqsoorka diiradda saarayso adigoo Barnaamijka Dhiirigalinta Tayada u qaybinayo laba qaybood oo si wadajir ah u shaqeynayo:
    a. Qayb yar oo ka mid ah cabbirada waxyaabaha gacanta ka geysto caafimaadka ee diiradda saaraysa taageeridda xaqsoorka caafimaadka una baahan dadaal joogto ah inta lagu jiro muddada ka-tanaasulkan;
    b. Qayb ka mid ah cabbirada adeegyada caafimaadka ee dhaqameed oo laga soo xushay Medicaid-ka Dadka Waaweyn iyo Qaybaha Aaasaasiga u ah Caruurta ee CMS (iyo haddii ay suurtagasho qaybta cabbirada mustaqbalka ee Nidaamka Qiimeynta Tayada ee MCO-yada Medicaid) oo diiradda saaraysa arrimaha sida tayada, helitaanka, iyo natiijooyinka iyadoo si gaar ah xoogga loo saarayo dhimista xaqsoor la'aanta;
2. Awoodda go'aan-qaadashada ku baahi bulshooyinka dhexdooda; iyo
3. Dib uga fikir qaabdhismeedka dhiirigalinta si sare loogu qaado xaqsoorka.

1. Dib Ugu Qaabee Barnaamijka Dhiirigalinta Tayada laba qaybood oo si wadajir ah u shaqeynayo si aad u ilaaliso booska shaqada ku saabsan waxyaabaha gacanta ka geysto caafimaadka ee diiradda saaraysa xaqsoorka

Si loo xaqiijiyo in dhammaan xubnaha Medicaid ay helaan daryeel tayo sare leh iyadoo mudnaanta la siinayo dadka ka tirsan bulshooyinka wajahaya xaqsoor la'aanta haddeer iyo mida taariikhiga, Oregon waxa ay soo

jeedinaysaa in Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada loo qaybiyo laba qaybood oo is wadajir ah u shaqeynayo iskuna xiran, kuwaasoo mid walba oo ka mid ah lagu dhiirigelin doono sare u-qaadista xaqsoorka.

a) Qayb yar oo ka mid ah cabbirada "waxyaabaha gacanta ka geysto caafimaadka" oo diiradda saaraysa waxyaabaha saameeya xaqsoorka caafimaadka

Qaybta koowaad ee qaab-dhismeedka cusub ee cabirista waxa ay ka koobnaan doontaa ilaa shan cabbiraad oo la dhiirigeliyay inta lagu gudajiro muddada ka-tanaasulaada. Cabbiradan ayaa la filayaa inay u baahdaan dadaal muddo dheer soconayo oo joogto ah si loo gaaro. Muddadan ka-tanaasulka, qaybta waxyaabaha gacanta ka geysanayo caafimaadka ayaa inta badan la aqoonsaday. Muddada ka-tanaasulaada ee xigta, OHA waxa ay la shaqayn doontaa Guddiga Cabbirada Tayada ee Xaqsoorka Caafimaadka (laga soo qaabeeyey Guddiga Cabbirada Tayada ee Qorshaha Caafimaadka ee jira, eeg istaratijiyada 2-aad ee ku taalo bogga 4-aad si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah) iyo dhinacyada kale ee danaynaya si loo qorsheeya oo hadday suurtogal tahayna loo sameeyo cabbiraadyo cusub.

Marka la eego wakhtiga ballaaran ee loo baahan yahay si loo sameeyo cabbiraadyo cusub, OHA waxay aqoonsatay afar cabbir oo haddeer jira oo loogu talagalay qaybta waxyaabaha gacanta ka geysto caafimaadka. Iyadoo ku xiran tixgalinada waqtiga, cabbir shanaad ayaa lagu dari karaa waxaana laga yaabaa in Guddiga Cabbirada Tayada ee Xaqsoorka Caafimaadka ee cusub uu haga sameynta cabbirka.

Cabbiradan waxaa la sameeyay xillika ka-tanaasulka ee haddeer iyo xilliyadii hore iyadoo laga jawaabayo falanqayn lagu sameeyay waxyeellada gaarayo dad khaas ah iyo baahiyada ay bulshadu aqoonsatay. Waxaa loogu talagalay in lagu dhiirigeliyo isbeddelada heerka nidaam ee hormarinaya xaqsoorka caafimaadka, waxayna wax ka qabtaan aaggaga aan haatan lahayn cabbiraad miqyaasyo leh. Jadwalka soo socdaa wuxuu qeexayaa afarta cabbiraad ee haddeer jira ee lagu dari doono cabbirada qaybta waxyaabaha gacanta ka geysanayo caafimaadka.

Cabbirada Xaqsoorka Caafimaadka ee Qaybta Waxyaabaha Gacanta Ka Geysto Caafimaadka	Sannadka la dhiirigeliyay	Macluumaad dheeraad ah
Qiimeynta Caafimaadka Maskaxda, Jirka iyo Afka oo ah 60 Maalmood Gudahood oo loogu talagalay Carruurta ay Masuulka ka tahay DHS[6]	2013	Waxay dhiirigelinaysaa qiimeynta la sameynayo waqti haboon oo loogu talagalay carruurta ku jirta daryeelka korinta, si markaa loo ogaado baahiyahooda caafimaadka jireed, caafimaadka afka iyo caafimaadka habdhaqameed oo wax looga qaban karo.
Helitaanka Luuqadeed oo Wax ku Ool ah oo ku aadan Adeegyada	2021	Waxay dhiirigelinaysaa bixinta adeegyada turjubaanka oo tayo sare leh marka loo baahdo iyo helitaanka daryeel iyo macluumaad

[6] https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/CCOMetrics/2014-Assessments-Children-DHS-Custody-Guidance-Document.pdf

Cabbirada Xaqsoorka Caafimaadka ee Qaybta Waxyaabaha Gacanta Ka Geysto Caafimaadka	Sannadka la dhiirigeliyay	Macluumaad dheeraad ah
Daryeelka Caafimaad ee La Jaanqaadayo Dhaqanka Bulsheed [7]		(sharaxaadaha macaashyada, khayraadyada guriga loo qaato, iyo in kalooo badan) lagu bixinayo luqadaha ay xubnuhu doorbidayaan, taasoo awood u siinaysa inay si wax ku ool ah uga qaybqaataan daryeelkooda.
Dhinacyada Caafimaad ee U-diyaargarowga Dugsiga Barbaarinta (HAKR)[8]	2022[9]	Waxay sii dhiirigelinaysaa xubnaha CCO in baahidooda bulshadeed la aqoonsado oo wax laga qabtio.
Waxyaabaha Ku saabsan Bulshada ee Gacanta Ka Geysto Go'aaminta Caafimaadka: Baarista iyo Gudbinta Baahiyada Bulshada[10]	2023[11]	Waxay dhiirigelinaysaa in adeegyo badan oo dhaqan ahaan la jaanqaadayo bulshada la bixiyo si looga caawiya carruurta inay bilaabaan dugsiga barbaarinta iyagoo diyaar u ah inay wax bartaan.

Sababta loo xushay waxyaabahan ayaa ah sida ay diiradda u saarayaan xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon ee wajahayo cadaalad darro taariikhigi ah iyo/ama mid haddeer jirta iyo cunsuriyad qaab-dhismeedsan. Bogagga internetka ee cabbirka hormarka ayaa bixiya macluumaad dheeraad ah oo ka socda koox-hawleedyada dadweynaha iyo dhinacyada kale ee daneynaya kuwaasoo ka shaqeeyay qeexida cabbirka iyo tijaabada. Qaybtan cabbirka ayaa u oggolaan doonta gobolka inuu la socdo hormarinada ku aadan helitaanka khayraadyada si toos ah wax uga qabta caddaalad-darrooyinkan.

b) Qayb ka mid ah cabbirada “adeegyada caafimaadka ee dhaqameed” ee diiradda saaraya tayada dhaqameed iyo cabbirrada helitaanka

Qaybta labaad ee qaab-dhismeedka cabirista cusub ayaa la jaanqaadi doonta cabbirada geedi-socodka daryeelka caafimaadka, natiijooyinka, iyo ka-faa'iideysiga qarameed (cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed). Cabbiradani waxay eegi doonaan tayada dhaqameed iyo xirmooyinka cabbirada helitaanka. Cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed waxaa laga soo xulan doonaa Medicaid-ka Dadka Waaweyn iyo Qaybaha Aaasaasiga u ah Caruurta ee CMS iyo cabbirada kale ee CMS looga baahan yahay (tus., waxaa ku jiri kara qaybta cabbirada mustaqbalka ee Nidaamka Qiimeynta Tayada ee MCO-yada Medicaid).[12] OHA waxay sameyn doontaa shuruudo lagu xaqiijinayo in cabbirada la xushay ay wax ka qabanayaan dhammaan baaxadda tixgelinada tayada daryeelka caafimaadka: qiimaha, tayada, helitaanka,

---

[7] https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/Pages/Health-Equity-Measurement-Workgroup.aspx

[8] https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/Pages/KR-Health.aspx

[9] Loogu talagalay qaybta Caafimaadka Shucuurta Bulsheed ee xirmada HAKR

[10] https://www.oregon.gov/oha/HPA/ANALYTICS/Pages/sdoh-measure.aspx

[11] Hirgelinta suurtagalka ah

[12] Maadaama ay kala duwan yihiin xirmooyinka faa’iidada ee gobolada, Oregon waxa ay aqoonsan tahay in qaybta Medicaid ee Dadka Waaweyn Aaasaasiga u ah aysan lahayn cabbiro loogu talagalay caafimaadka afka ee dadka waaweyn. Si loo buuxiyo farqigaa, Oregon ayaa laga yaabaa in qaybta cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed ay ku darto hal ama laba ka mid ah cabbirrada caafimaadka afka ee dadka waaweyn ee laga soo xigtay Isbahaysiga Tayada Ilkaha ama cabbir qaran ee la mid ah.

iyo xaqsoorka caafimaadka, iyo sidoo kale inay wax ka qabanayaan caafimaadka afka, habdhaqanka, iyo jirka. Sidii horeba, Guddiga Cabbirada & Dhibcaha ee Oregon ayaa xulan doona cabbirada, laakiin sida hoos lagu sharraxayba, guddi cusub oo dib loo habeeyey oo gooni ah oo loo yaqaan Guddiga Cabbirada Tayada ee Xaqsoorka Caafimaadka ayaa yeelan doona door kormeer iyo ansixin.

Habkani waxaa lagu saleynayaa shaqada Oregon looga baahan yahay inay ka qabato Qaybta Medicaid ee Caruurta Aaasaasiga u ah iyo cabbirada Daryeelka Caafimaad ee Habdhaqanka ee Qaybta Medicaid ee Dadka Waaweyn Aaasaasiga u ah marka warbixintu noqoto mid qasab ah sanadka 2024. La Jaanqaadida Qaybaha Muhiimka ah ee CMS waxay kor u qaadi doontaa kaydinta kharashka waxayna sahli doontaa isbarbardhig lagu sameeyo waxqabadka barnaamijyada Medicaid ee kale ee gobolka. Cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed ayaa lagu kormeeri doonaa loogana soo warbixin doonaa heer bulsho-hoosaad si loo xaqiijiyo tayada iyo helitaanka xubnaha iyadoo la eegayo jinsiyada/qowmiyada, luqadda, iyo kooxaha naafada ah mar kasta oo ay suurtagal tahay. Cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed ayaa la sii dhiirigelin doonaa si loo helo horumarinta tayada oo joogta ah iyo, sida lagu sheegay Istaraatiijiyada 3-aad ee hoose, waxay isticmaali doontaa habab cusub oo bartilmaameed ah markay suurtagal tahay si wax looga qabto xaqsoor la'aanta kajirta kooxaha qowmiyadaha iyo jinsiyadaha laga tiro badan yahay.

2. Ku baahi awoodda go’aan-qaadashada bulshada

Si loo xaqiijiyo in Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada uu sii wado hormarino heer nidaam ah iyo sidoo kale hormarinada daryeelka bukaanka, dadka ay sida ugu weyn u saameysay xaqsoor la'aanta caafimaadku ayaa awood ku yeelan doona qaabdhismeedka guddiga xulanayo cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed.

OHA waxaa ka go'an in ay awooda ay dib u siiso Barnaamijka Dhiirrigelinta Tayada waxayna qorshaynaysaa in ay wax ka beddesho qaab-dhismeedka guddiyada mas'uulka ka ah xulashada iyo dhiirigelinta cabbirada. Iyadoo la joogteynayo habka guddiga dadweynaha ee xulashada cabbirada, OHA waxay ku talo jirtaa inay kala shaqeyso golaha sharci-dejinta sidii wax looga beddeli lahaa sharciyada lagu dhisayo guddiyada cabbirada si markaa Guddiga Cabbirada Tayada ee Qorshaha Caafimaad ee haddeer ay u beddeli karaan xubinnimadooda, diiradda saaristooda iyo doorkooda si ay u noqdaan Guddiga Cabbirada Tayada ee Xaqsoorka Caafimaadka (HEQMC). Xubnaha HEQMC waxay matali doonaan danaha dadka ay aadka u saameysay xaqsoor la'aanta caafimaadka oo ay ku jiraan xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon, xubnaha bulshada ee ka kala socda bulshooyinka kala duwan, shakhsiyaadka khibradda u leh xaqsoor la'aanta caafimaadka, iyo xirfadlayaasha iyo cilmi-baarayaasha xaqsoorka caafimaadka.

Guddigan ayaa kormeeri doona oo ansixin doona cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed ee ay xusheen Guddiga Cabbirada iyo Dhibcaha waxayna kala talin doonaan OHA sida loo naqshadeynayo barnaamijka si wax looga qabto tabashooyinka iyo ahmiyadaha xubnaha iyo bulshada. Maadaama OHA ay adeegsanayso istaraatijiyadaha ku lug lahaanshaha bulshada oo ballaadhan, tallooyinka laga helo wadahadalaas ayaa sidoo kale gacan ka geysan doona xulashada iyo hirgelinta cabbirka. Intaas waxaa dheer, OHA waxay tixgelin doontaa ra’yiga xubnaha iyo bulshada marka la soo bandhigayo waxqabadka cabbirka. Tusaale ahaan, OHA waxa ay sii wadi doontaa in ay soo saarto warbixin sanadle ah oo ku saabsan Cabbirada Dhiirigelinta ee CCO waxayna xogta tiro ee caadiyan ku jirta warbixintan ku kabi doontaa xog tayo, oo ay ku jiraan ahmiyadaha ay aqoonsadeen xubnaha HEQMC.

3. Dib uga fikir qaabdhismeedka dhiirigalinta si sare loogu qaado xaqsoorka

Barnaamijka Dhiirrigelinta Tayada ee Oregon ee haatan jira waxa uu ka kooban yahay hal qayb oo cabbiro ah oo loo dhiirigeliyay wareega koowaad ee lacag-bixinta iyo qayb-hoosaad loo dhiirrigeliyay koox tartan.

Marka la isticmaalayo habkan, lacag kasta oo dhiirigelin ah oo aan la kasban wareegii koowaad waxaa lagu qaybin doonaa wareegga koox-tartanka. Inta lagu gudajira wareega koowaad iyo midka koox-tartanka, CCO-yadu waxay kasban karaan dhiirigelin iyagoo buuxinayo bartilmaameed guud ama " bartilmaameed hormarin" oo gaar u ah CCO-da kaasoo loo xisaabiyay qaab uu ku yareynayo farqiga u dhexeeya waxqabadka gundhigga ah ee CCO-yada iyo bartilmaameedka. Sannad kasta, dhammaan lacagta tayada ee la heli karo waa la bixiyaa; haddii ay jirta wax lacag ah oo aan la bixin wareegii koowaad, waxaa lagu bixiyaa wareega koox-tartanka.

In kastoo qaab-dhismeedkan guud uu sidii hore usii ahaan doono ka-tanaasulaada 2022-2027, OHA waxa ay soo jeedinaysaa in ay la shaqeyso Guddiga Cabbirada Tayada ee Xaqsoorka Caafimaadka ee cusub iyo Gudiga Cabbirada iyo Dhibcaha si ay u xushaan cabbirada waxyaabaha gacanta ka geysto caafimaadka iyo kuwa adeegyada caafimaad ee dhaqameed ee la dhiirigaliyay si loo wanaajiyo xaqsoorka caafimaadka. OHA waxay u soo bandhigi doontaa guddiyada habab kala duwan oo ay ka xulanayaan.

Tusaale ahaan, markay timaado cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed, hal ikhtiyaar ayaa ah in kaliya cabbirada u-qalma koox-tartameedka ay yihiin kuwa wax ka qaban doona xaqsoor la'aanta weyn, iyo in bixinta lacagaha koox-tartanka ay ku xirnaan doonta dhimista xaqsoor la'aanta cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed halkaasoo waxqabadka la barbardhigi karo barnaamijyada kale ee Medicaid ee gobolka.

Ikhtiyaar kale ayaa ah in diirada la saaro duleelada waxqabadka aan sinnayn ee dhammaan cabbirada u qalma, oo aanan lagu ekaynin kaliya koox-tartanka. Tan ayaa la gaari karaa iyadoo bixinta lacagta dhiirigelinta laga dhigayo mid ku xiran gaaritaanka bartilmaameedka hormar ee gaarka u ah cabbirka CCO-da (beddelkii laga dhigi lahaa cabbirka bartilmaameedka guud) marka la eegayo dhammaan bulsho-hoosaadyada leh ugu yaraan 50 xubnood. Marka la eego xulashadan CCO-yadu ma awoodi doonaan inay ku tiirsanaadaan inay beegsadaan kaliya bartilmaameedka in ay hormar ka sameeyaan dhammaan bulsho-hoosaadyada.

Marka la eego cabbirada waxyaabaha gacanta ka geysnayo caafimaadka ee diiradda saarayo sixitaanka nidaamyada iyo qaab-dhismeedyada abuuraya xaqsoor la'aanta, lacagta dhiirigelinta CCO-yada ayaa la bixin doonaa cabbirkiiba iyadoo lagu saleynayo hormarinta bartilmaameedyada gaarka u ah CCO-da ama gaarista bartilmaameedka. Lacagaha aan la kasban kadib bixinta lacagta cabbirada waxyaabaha gacanta ka geysanayo caafimaadka, iyo sidoo kale wixii lacag ah ee aan lagu kasban gudaha wareega koowaad ee lacag-bixinta cabbirada adeegyada caafimaad ee dhaqameed, ayaa la bixin doonaa wareega koox-tartanka. Oregon waxay sahan ku sameyneysaa sida ugu wanaagsan ee loo maalgelin kara lacagaha dhiirigelinta tayada: inay noqoneyso mid lala harayo, gunnad ahaan, ama isku darka labaduba.

Maamulka ka-tanaasulka hadda jira

Barnaamijka Dhiirrigelinta Tayada ee CCO waxaa ugu horeyntii lagu sheegay bandhigga fidinta iyo wax ka beddelka Oregon ee 2012, sidaa darteed waxkabeddel kasta oo lagu sameynayo barnaamijka wuxuu u baahan yahay in laga xaajoodo xilliyada dib-u-cusboonaysiinta ka-tanaasulada xigta. Codsigan ka-tanaasulaaada, Oregon waxa ay soo jeedinaysaa in dib loo habeeyo Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada ee CCO si mudnaan loo siiyo horumarinta xaqsoorka caafimaadka taasoo taageerayso yoolka Maamulka Caafimaadka Oregon ee ah in meesha looga saaro xaqsoor la'aanta caafimaadka ugu dambeyn sanadka 2030. Hoos waxaa ku taxan istaraatijiyada aasaasiga ah ee mudnaanta la siinayo si loo hormariyo xaqsoorka caafimaadka iyo shuruudaha khaaska ah ee laxidhiidha (STC) ee laga yaaba inay u baahato wax-ka-beddel:

1. **Dib Ugu Qaabee Barnaamijka Dhiirigalinta Tayada laba qaybood oo si wadajir ah u shaqeynayo si aad u ilaaliso booska shaqada ku saabsan waxyaabaha gacanta ka geysto caafimaadka ee diiradda saaraysa xaqsoorka**

   STC 39: Cabbirada Tayada iyo Warbixinta ee Dheeraadka ah ee Heerka CCO. CCO-yada waxaa looga baahan doonaa inay ururiyaan oo ay xaqiijiyaan xogta oo ay uga warbixiyaan gobolka cabbirada ku taxan qeybtan, kuwani oo dib loo eegi karo ama wax lagu dari karo wakhti kadib xilliyada tijaabada. CMS ayaa sidoo kale ku dhiirigelinaysa CCO-yada in ay ka soo warbixiyaan Qaybta Aaasaasiga ah ee Cabbirada Tayada ee Daryeelka Caafimaadka Carruurta ee Medicaid iyo CHIP (Qaybta Aaasaasiga ah ee Caruurta) iyo Qaybta Aaasaasiga ah ee Cabbirada Tayada ee Daryeelka Caafimaadka Dadka Waaweyn ee Medicaid (Qaybta Aaasaasiga ah ee Dadka Waaweyn), kuwaasoo si wadajir ah loogu yeero Qaybaha Aaasaasiga ah ee Cabbirada Daryeelka Carruurta iyo Dadka Waaweyn (CMS) ee Medicaid iyo CHIP.

2. **Ku baahi awoodda go'aan-qaadashada bulshada**

   STC 38: Guddiga Cabbirada iyo Dhibcaha. Istaraatiijiyada gobolka ee cabbiraadda xoogan waxaa ka mid ah Guddiga Cabbirada iyo Dhibcaha. Guddigu wuxuu dib u eegayaa xogta iyo suugaanta habboon wuxuuna go'aaminayaa cabbiraadaha lagu dari doono barnaamijka dhiirigelinta CCO-yada wuxuuna dejinayaa bartilmaameedyada waxqabadka iyo yoolalka lagu isticmaali doona barnaamijkan dhiirigelinta. Guddigu wuxuu ansixin doonaa qeexitaano gaar u ah cabbir kasta. Sanadaha soo socda, Guddigu wuxuu dib u eegi doonaa go'aanadii hore wuxuuna sameyn doonaa isbeddelo hadba sida loogu baahdo. Guddiga Cabbirada iyo Dhibcaha wuxuu ku talinayaa cabbirro loo isticmaali doono go'aaminta dhiirigelinta maaliyadeed ee CCO-yada.

3. **Dib uga fikir qaabdhismeedka dhiirigalinta si sare loogu qaado xaqsoorka**

   STC 36e.iii: Gobolka wuxuu aasaasi doonaa lacag dhiirigelineed. Dhiirigelinada waa in loo qaabeeyaa qaab lagu dhimayo kharashaadka laguna wanaajinayo natiijooyinka daryeelka caafimaad. Marka la sameynayo lacagta dhiirigelinta, gobolku wuxuu tixgelin doonaa sida loo bixin dhiirigelinada sare u-qaadista natiijooyinka/helitaanka waxaana hoos u dhacaya kharashka si loo yareeyo dhiirigelinta biilasha waaweyn. Lacagta dhiirigelinta waxay u hoggaansami doontaa qaybaha ku haboon ee 438.6. Gobolku wuxuu ogeysiin doonaa CCO-yada in lacagta dhiirigelinta lagu xiriirin doono waxqabadka CCO kasta ee ku saabsan cabbirada tayada iyo helitaanka ee lagu aasaasay Qeybta VII, iyo in dhammaan qaddarka lacagta dhiirigelinta ay khatar geli doonto. Gobolku waxa uu abaal-marin dhiirigelin oo weyn siin doonaa CCO-yada leh waxqabad sare oo dhammaystiran oo ku saabsan cabbirada tayada iyo helitaanka marka la barbardhigo bartilmaameed habboon wuxuuna abaal-marin dhiirigelin oo weyn siin doonaa CCO-yada wanaajiyo waxqabadka muddo kadib marka la barbardhigo waxqabadkoodii hore.

Waxa siyaasadahani uga dhigan yhiin xubnaha OHP

Marka la adeegsado qaab-dhismeedka dhiirigelin ee dib loo eegay, dhammaan xubnaha OHP waxay filan karaan inay arkaan hormarka natiijooyinka xaqsoorka caafimaadka iyo tayada daryeelka caafimaadka ay bixinayaan CCO-yada. Xubnaha OHP iyo bulshooyinku waxay cod intii hore ka weyn ku yeelan doonaan barnaamijka dhiirigalinta tayada. Xawliga wanaajinta xaqsoor la'aanta caafimaadka ee CCO-yadu ayaa la cabbiri doonaa, la kormeeri doonaa oo si guud looga soo warbixin doonaa. Marka la eego cabbirada tayada daryeelka caafimaadka, CCO-yadu waxaa laga xisaabtami doonaa waxqabadka la wanaajiyay ee loogu

talagalay xubnahooda guud iyo sidoo kale kooxaha ka tirsan jinsiyadda iyo qowmiyadaha laga tiro baan yahay ee xubnaha ka ah CCO-yada.

Barnaamijkadib loo eegay waxaa ka mid ah cabbirada xaqsoorka caafimaadka oo deegaanka lagu sameeyay. Tusaale ahaan, cabbirka helitaanka luqadda ee wax ku oolka ah waxaa loogu talagalay in looga caawiyo xubnaha inay adeegyada turjubaanka oo tayo sare leh markii loo baahdo iyo inay daryeelka iyo macluumaadka (sharaxaadda macaashyada, khayraadyada guriga lala aado, iyo in kaloo badan) ku helaan luqadaha ay doorbidayaan iyo qaabab si fudud loo fahmi karo, si ay markaa si wax ku ool ah ooga qaybqaadan karaan daryeelkooda. Cabbirka caafimaadka shucuurta-bulsho waxaa loogu talagalay in looga caawiyo qoysaska inay ku xirmaan adeegyada loo baahan yahay, oo ay ku jiraan adeegyada dhaqanka la jaanqaadayo, si carruurtu u bilaabaan dugsiga barbaarinta iyagoo diyaar u ah inay wax bartaan. Qiimeynta carruurta ay gacanta ku haysa DHS waxa loogu talagalay in lagu xaqiijiyo in carruurta ku jirta daryeelka korinta ay helaan qiimayn wakhti habboon la sameynayo oo ku saabsan caafimaadkooda jireed, caafimaadka afka iyo caafimaadka habdhaqan, si baahidooda loo aqoonsado loona daboolo. Cabbirka baaritaanka iyo gudbinta baahiyada bulshada wuxuu CCO-yadu uga baahan doonaa inay dhisaan iskaashi ay la yeeshaan ururada bulsheed iyo inay wanaajiyaan hababka si wax looga qabto baahiyaha bulsho ee aan la daboolin ee xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (cunto yarida, hoy la'aanta, iyo baahiyada gaadiidka).

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.